# XEER-HOOSAADKA
# GUDDIGA QARANKA EE SHAQAALHA
# RAYIDKA AH EE DAWLADDA

---

# THE INTERNAL REGULATIONS
# FOR
# THE NATIONAL CIVIL SERVICE COMMISSION

---

**Baydhabo, December 13, 2006**

**Contact: Tel: +2521-5523314 or 5524728 or 5531260 or 367650, 214856 E-mail: Somalia_ncsc@yahoo.com**

# JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

## Xeer-Hoosaadka Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda

**Hordhac:**

- *Ka dib markuu Guddigu arkay qodobka 68-aad ee Axdiga Qaranka ee KMG ah iyo sharciga lagu dhisay Guddigan ee ka soo baxay Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federalka KMG ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya;*
- *Markuu garwaaqsady in xilka iyo waajibaadka qarameed ee hor yaalla Guddigu ay yihiin kuwo aad u culus;*
- Markuu tixgeliyay in loo baahan yahay inuu Guddigani degsado Xeer-Hoosaad uu ku shaqeeyo iskuna dhaqo;
- Guddigu wuxuu guddoonsaday isla markaasna ansixiyay in lagu dhaqmo Xeer-hoosaadkan:

### Qodobka 1-aad
### Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda

1) Guddigu waa Hay'ad Qaran oo madax bannaan, hawshiisa ugu weynina waa qoridda shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda iyo ilaalinta xuquuqdooda.
2) Guddigu wuxuu ku shaqaynayaa xaruntiisa weynina noqonaysaa hadba meesha ay Xukuumadda Federalka KMG ahi ku shaqaynayso saldhiggeeduna yahay.

### Qodobka 2-aad
### Qaab-Dhismeedka Guddiga

1) Gudddigu wuxuu ka kooban yahay **14 xubnood,** wuxuuna leeyahay **Guddi Fulin**

   **(Executive):**

- Guddoomiye,
- Guddoomiye-ku-Xigeen,
- Xoghaye.

2) Guddigu wuxuu kaloo leeyahay Guddi-Hoosaadyo kala ah:

I) Guddi-Hoosaadka Kormeerka, Anshaxa & Abaalmarinta

II) Guddi-Hoosaadka Imtixaanaadka & Shaqoqorista.

III) Guddi-Hoosaadka Diiwaangelinta & Tababarrada.

## Qodobka 3-aad
## Laamaha uu Guddigu yeelanayo

Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladdu wuxuu Laamo amaba wakiillo ku yeelan karaa Gobollada & Degmooyinka Dalka.

## Qodobka 4-aad
## Waajibaadka Guddiga

1. Guddigani waa hay'ad Qaran wuxuuna u madax bannaan yahay shaqadiisa iyo maamulkiisa gaarka ah.
2. Guddigu fadhigiisa koowaad wuxuu sameysanayaa Xeer-Hoosaad uu isku maamulo.
3. Guddigu waxa uu qorayaa shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Federaalka iyo kuwa Gobollada & Degmooyinka.
4. Dallacsiinta shaqaalaha joogtada ah ee Dawladda iyo kuwa kumeelgaarka ah.
5. Anshaxmarinta shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Federaalka iyo kuwa Gobollada & Degmooyinka.
6. Shaqo-ka-fadhiisinta shaqaalaha Dawladda Federalka iyo kuwa Gobollada & Degmooyinka.
7. Ilaalinta xuquuqda shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda, isagoo raacaya shuruucda u degsan.
8. Diiwaangelinta iyo kaydinta dokumentiyada shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda.
9. Dejinta imtixaanaadka shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda.
10. Qaabaynta iyo fulinta tababarrada shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda.

## Qodobka 5-aad
## Waajibaadka Xubnaha Guddiga

1. Xubnaha Guddigu waa inay ilaaliyaan shuruucda dalka iyo xeer-hoosaadka Guddiga.
2. Xubnaha Guddigu waa inay ilaaliyaan sharaftooda, sharafta waddankooda iyo shaqada ay Ummadda u hayaan.
3. Xubnaha Guddigu waa inay illaaliyaan wakhtiga shaqada iyo habsami u socodka hawlaha kala duwan ee Guddiga.
4. Xubnaha Guddigu waa inay dhawraan kala dambeynta iyo masuuliyadda xubinnimo.
5. Xubin kasta oo Guddiga ka mid ah waxaa ku waajib ah ka-qayb-galka fadhiyada Guddiga, kuwa caadiga iyo kuwa aan caadiga ahayn.

## Qodobka 6-aad
## Dhaarta Xubnaha Guddiga

Guddigu wuxuu marayaa Dhaartan, inta uusan guda galin hawshiisa,

**(WAXAA IGU WALLAAHI AH, IGU BILLAAHI AH, IGU TALLAAHI AH IN AAN U HOGGAANSAMAYO AXDIGA IYO SHARUUCDA DALKA, IN AAN HIRGELINAYO MABAADI'DA GUUD EE DAWLADDA, ANIGOO HAWSHA LA II XILSAARAY U GUDANAYA SIDA SHARCIGU FARAYO ANIGOO MUUJINAYA DADAAL, XILKASNIMO, EEX-LA'AAN, DHAWRAYANA SIRTA DAWLADDA WAXAANNA KU DADAALI DOONAA INAAN DHAWRO NABADGELYADA, SHARAFTA IYO JIRITAANKA QARANKA).**

## Qodobka 7-aad
## Xafidaada Sirta Guddiga

1. Go'aanada iyo wadahadallada fadhiyada Guddigu waa sir culus.
2. Xubnaha Guddiga waxaa ka reebban inay bixiyaan sirta Guddiga.
3. Xubintii fidisa ama bixisa sirta Guddiga ama gardarro ku dacwaysa ama borobagaanta xubnaha Guddiga, waxaa dacwad looga soo gudbinayaa Guddi-Hoosaadka Kormeerka, Anshaxa & Abaalmarinta si looga qaado tallaabada ku habboon.

## Qodobka 8-aad
## Fasax-Sannadeedka Guddiga

1. Guddigu wuxuu leeyahay fasax-sannadeed ay muddadiisu hal bil tahay.
2. Haddii ay jirto baahi Qaran, Xubnaha Guddiga waa looga yeeri karaa ama laga soo celin karaa fasaxooda, waxaana isugu yeeri kara Guddoomiyaha Guddiga ama Xukuumadda.
3. Waxaa kaloo xubnaha fasaxooda dib loogaga soo celin karaa codsi ka yimid saddex dalool oo hal meel (1/3) xubnaha Guddiga.
4. Fasaxa laga soo celiyay, waxaa xubnaha dib loo siinayaa waqti kale oo ku habboon.

## Qodobka 9-aad
## Xuquuqda iyo Xasaanadda Guddiga

1. Guddiga iyo xubnihiisu waxay leeyihiin Hab-Maamuus Qaran oo lagu caddayn doono Xeerka Hab-Maamuuska Qaranka (National Protocol).
2. Guddigu wuxuu xaq u leeyahay dakhli bileed isugu jiri kara mushaaro ama/iyo gunnooyin kala duwan (gunno xileed, gunno guri, gunno safar iwm).

## Qodobka 10-aad
## Fadhiyada Guddiga

1. Guddigu waxa uu yeelanaayaa fadhiyo caadiga ah oo qabsooma, ugu yaraan, **toddobaadkiiba hal mar**.

2. Guddigu wuxuu kaloo yeelan karaa fadhiyo aan caadi ahayn oo markii loo baahdo la qaban karo.

3. Fadhiyada Guddiga, kuwa caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahaynba, waxaa isugu yeeri kara:

- Guddoomiyaha Guddiga;
- Xukuumadda;

- Saddex dalool oo hal meel (**1/3**) Xubnaha Guddiga.

4. Fadhiyada Guddiga waxaa guddoomiya Guddoomiyaha Guddiga, haddii uusan jooginna Ku-Xigeenkiisa; haddii ay labadooduba maqan yihiin waxaa shirguddoomiye noqonaya Xoghayaha Guddiga. Haddii ay saddexda xubnood ee Guddiga Fulintu wada maqan yihiin, xubnaha fadhiga jooga ayaa iska dhex dooranayaan shirguddoomiye.

5. Fadhiyada Guddigu waxay ku qabsoomaan Xarunta Guddiga haddii aan goob kale la tilmaamin xubnahana lagu wargelin.

## Qodobka 11-aad
## Tirada Kooramka Fadhiyada Guddiga

1. *Fadhiyada Guddigu waxay ku furmi karaan ansaxna ku noqon karaan marka ay joogaan kala bar tirada xubnaha Guddiga oo hal lagu daray (1/2+1).*

2. *Aqlabiyaddaasi waxay noqonaysaa saddex dalool oo laba meelood xubnaha Guddiga (2/3 majority) haddii go'aannada fadhigu ay ku saabsan yihiin:*

   (a) *Wax-ka beddelid ama burin go'aan horay u jiray.*

   (b) *Kalsooni kala noqoshada xubin Guddiga ka mid ah ama xil-ka-qaadis Madaxda Guddiga.*

   (c) *Wax-ka- beddelid Xeer-Hoosaadka Guddiga.*

## Qodobka 12-aad
## Habka go'aan-qaadashada fadhiyada Guddiga

1. Xubnaha Guddigu waxay ku dedaalayaan inay go'aannadooda ku gaaraan si isqancin ah (**consensus**), hase yeeshee haddii la ismari waayo waxaa lagu kala baxayaa cod hal dheeri ah, marka laga reebo arrimaha la adkeeyay ee faqradda **2-aad** ee qodobka **11-aad** lagu tilmaamay.

2. Haddii ay tirada codadka **oggol** iyo **diiddan** isle'ekaadaan, waxaa guulaysanaaya dhinaca uu shirguddoomiyuhu raaco waayo xaaladdan oo kale wuxuu yeelanayaa laba cod.

## Qodobka 13-aad
## Ka-qaybgalka, Xurmaynta Iyo Hadalqaadashada Fadhiyada Guddiga

1. Xubin walba waxaa ku waajib ah inay saxiixdo warqadda xaadirinta xubnaha (**Attendance Sheet**), ka hor intaan fadhiga Guddiga si rasmi ah loo furin.
2. Inta aan doodda ajendihiisa la guda gelin, waxaa fadhiga lagu furayaa **Aayado Quraanka Kariimka ah.**
3. Xubin waliba waxay xaq u leedahay ka-qaybgalka doodaha fadhiyada Guddiga, iyadoo farta taagaysa si ay hadalqaadashada isugu qorto ama u qaadato.
4. Xubinta hadalka la siiyay lama qalin daari karo, lama dhabqin karo dooddeedana lagama dhex geli karo, haddii aysan arrintu ahayn nidaamtoosin (**point of order**) la weydiistay uuna oggolaaday shirguddoomiyuhu.
5. Xubin kasta oo Guddiga ka mid ahi waa inay dhawrto nidaamka fadhiyada Guddiga, u dheganuglaato shirguddoonka isla markaasna xushmayso xubnaha kale.
6. Xubintii xurmayn weyda fadhiyada Guddiga, hawshuna ka socon weydo, shirguddoomiyaha ayaa fadhiga ka saaraya oo sidaas awood buuxda u leh.
7. Haddii ay xubintaasi awaamirta shirguddoomiyaha u hoggaansami diiddo, fadhiga waa la xirayaa isla markaasna waxaa dacwad looga gudbinayaa Guddi-Hoosaadka Kormeerka, Anshaxa & Abaalmarinta.

## Qodobka 14-aad
## Shuruudaha laga rabo qofka loo dooranayo Madaxnimada Guddiga

1. Waa inuu u soo gudbiyaa codsi qoraal ah Xafiiska Guddiga.
2. Waa in uu ku soo lifaaqaa codsiga, taariikh-nololeedkiisa (**C.V**).
3. Waa inuu yahay xubin ka mid ah Guddiga.
4. Waa inuu waayo-aragnimo shaqo leeyahay.
5. Waa inuu yahay qof magac fiican ku leh bulshada dhexdeeda.
6. Waa inuu leeyahay karti uu ku gudan karo xilka uu isu sharraxayo.
7. Waa inuu haystaa ugu yaraan shahaado jaamacadeed ama wax u dhigma.
8. waa inay caafimaad ahaan maskaxdiisu taam tahay.

## Qodobka 15-aad
## Habka doorashada madaxda Guddiga

1. Waa inay buuxdaa tirada Kooramka fadhiga Guddigu, taasoo ah saddex dalool oo laba meelood (2/3) xubnaha Guddiga.
2. Codayntu waa gacantaag.

3. Codayntu waxay socon kartaa ilaa laba (2) wareeg:
   (a) Wareegga hore waxaa ku guulaysanaaya tartamihii hela kala bar tirada xubnaha Guddiga oo lagu daray hal cod (simple majority).
   (b) Wareegga labaad waxaa gelaya labada tartame ee ugu codadka batay wareeggii hore waxayna ku kala guulaysanayaan cod hal dheeri ah.

## Qodobka 16-aad
## Muddada xilka Madaxda Guddiga

1. Guddoomiyaha, Guddoomiye-Ku-Xigeenka iyo Xoghayaha Guddigu waxay xilalka haynayaan, muddo labo sano ah, laga bilaabo maalinta la doorto.
2. Guddoomiyaha, Guddoomiye-Ku-Xigeenka iyo Xoghayaha Guddigu waa isu soo sharrixi karaan jagooyinkooda, intii goor oo ay doonaan, haddii aysan jirin dembi horay xilalkooda loogaga qaaday.

## Qodobka 17-aad
## Waajibaadka Guddoomiyaha

1. Waa madaxa ugu sarreeya ee Guddiga, wuxuuna fuliyaa go'aannada iyo qorshaha hawlced ee Guddiga isagoo la kaashanaya xubnaha kale ee Fulinta, inta u dhaxaysa fadhiyada Guddiga.
2. Isugu yeerista Guddiga, fadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahaynba.
3. Hoggaaminta fadhiyada Guddiga iyo qaybinta hadalka.
4. Furidda, xiridda, iyo dib-u-dhigidda fadhiyada Guddiga.
5. Isku xiridda Guddiga iyo qaybaha kale ee Dawladda.
6. Saxiixa hadalqoraallada (**minutes**) iyo go'aannada fadhiyada Guddiga.

7. Saxiixa waraaqaha iyo dokumentiga ka baxaya Guddiga, gudo iyo dibad meel kasta ha u socdeene.

## Qodobka 18-aad
## Xilka guddoomive-Ku-Xigeenka

1. Gudoomive-Ku-Xigeenku wuxuu qabtaa xilka Gudddoomyenimada Guddiga, marka uu dalka ka maqan yahay Guddoomiyuhu ama ay ku timaaddo jirro u saamixi kari weyda gudashada xilkiisa.
2. Wuxuu kaloo qabtaa hawsha uu gudoomiyuhu u xil saaro.

## Qodobka 19-aad
## Waajibaadka Xoghayaha Guddiga

Xoghayaha Guddigu wuxuu qabtaa xilalka soo socda:

1. Ogeysiinta Xubnaha Guddiga wakhtiga iyo goobta fadhiyada.
2. Qaadista hadalqoraalka fadhiyada Guddiga.
3. Ururinta talo soo jeedinta fadhiyada.
4. Diyaarinta go'aannada fadhiyada Guddiga.
5. Diiwaangelinta, kaydinta iyo xafidaadda dokumentiga Guddiga: Warqad kasta oo Guddiga soo gasha waa in buug lagu diiwaan geliyo, tallaabada ku habboon laga qaado dabadeedna la meeleeyo; sidoo kale, warqadaha ka baxaya Guddiga waa in la diiwaan geliyaa, nuqulna laga kaydiyaa.
6. Inuu Guddoomiyaha la saxiixo hadalqoraallada iyo go'aannada Guddiga.
7. Waxaa kale oo uu Xoghayuhu qabtaa shaqadii kale ee uu Guddoomiyuhu u xilsaaro.

## Qodobka 20-aad
## Sababaha Xubintu ay xilka ku waayi karto

1. Geeri ku timaadda.
2. Istiqaalad (iscasilaad) qoraal ah oo laga aqbalay.
3. Caafimaad-darro ku timaadda oo uu xilkiisa la gudan kari waayo.
4. Haddii ay qabato xil kale oo aan u saamixi karaynin inay si buuxda xilkeeda & waajibaadkeeda u gudato.

5. Curyaamin shaqada xilka guddinnimo.
6. Ka maqnaansho fadhiyada Guddiga muddo dhan 3 bilood, cududaar la'aan.
7. Dhaqan xumo, bulshada iyo Guddiga dhexdiisa ah.
8. Haddii ay gasho faldembiyeed maxkamadina xukun kama dambays ah ku riddo.
9. Lunsasho hanti qaran.
10. Haddii ay xubintu bixiso sirta Guddiga.
11. Qaadasho laaluush.
12. Ku dhaqan shaqada dhexdeeda eex, qabiil, xaqiraad, iwm.
13. Sababaha kale ee ku cad sharciga lagu dhisay Guddiga.

## Qodobka 21-aad

## Shuruudaha ay xilka ku waayi karaan Guddoomiyaha, Guddoomiye-ku-Xigeenka & Xoghayaha Guddiga

Madaxda Guddigu shuruudaha ku xusan qodobka 20-aad waxay kala mid yihiin xubnaha Guddiga ee caadiga ah, hase yeeshee waxaa intaas u dheer oo ay xilalka hoggaamineed ee ay Guddiga u hayaan ku waayi karaan qodobbada soo socda:

1. Xil gudasho la'aan joogto ah.
2. Ku takri fal awoodda Guddiga.
3. Anshax xumo uusan ku hoggaamin karin Guddiga.

Markii ay ku caddaato Guddoomiyaha ama xubnaha kale ee haya xilka maamul eé Guddiga arrimaha ku xusan qodobkan, Guddigu waxay kala noqon karaan kalsoonida iyadoo ay **shardi tahay** inay kalsooni-kala-noqoshada ama xil-ka-qaadista oggoladaan saddex dalool oo labo (2/3) xubnaha Guddiga.

## Qodobka 22-aad
## Anshaxmarinta Xubnaha Guddiga

1. Awoodda anshaxmarinta xubnaha Guddiga waxaa iska leh Guddiga laftiisa.
2. Ka sokow Xeer-Hoosaadkan, anshaxmarinta Xubnaha waxaa loo raacayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

## Qodobka 23-aad

## Guddi-Hoosaadyada Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda

1. Sida ku cad qaab-dhismeedkiisa, Guddigu wuxuu leeyahay saddex Guddi-Hoosaad oo mid waliba yeelanaayo Guddoomiye iyo Xoghaye u gaar ah.
2. Guddi-Hoosaadyadu waxay fulinayaan xilalka iyo waajibaadka mid kasta ku hoos qoran:

### I. Guddi-Hoosaadka Kormeerka, Anshaxa & Abaalmarinta:

1. Guddi-Hoosaadkani wuxuu kormeer ku sameeyaa dhammaanWasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee ay ka hawl galaan shaqaalaha rayidka ah ee Dawladdu.
2. Guddi-Hoosaadku wuxuu kaloo kormeer kaas la mid ah ku samayn karaa Gobollada & Degmooyinka Dalka.
3. Guddi-Hoosaadku wuxuu hubiyaa inay shaqaalaha rayidka ah ee Dawladdu si habsami ah u gutaan waajibaadkooda shaqo.
4. Guddi-Hoosaadku wuxuu u kuur galaa sida sharciga shaqaalaha loogu dhaqmo goobaha shaqadana looga fuliyo isagoo iskaashi kala yeelanaya Wasaaradda Shaqada & Horumarinta Shaqaalaha.
5. Guddi-Hoosaadku wuxuu hubiyaa inay shaqaalaha rayidka ah ee Dawladdu si buuxda u helaan xuquuqdooda shuruucdu u oggoshahay.
6. Guddi-Hoosaadku wuxuu Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda iyo Xeer-Hoosaadka Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda ka ilaaliyaa in lagu xad gudbo ama si khaldan loogu dhaqmo.
7. Guddi-Hoosaadku wuxuu baaris ku sameeyaa gefafka ka dhaca hawlaha iyo fadhiyada Guddiga wuxuuna ka talo bixiyaa tallaabooyinka ku habboon oo lagu saxi karo.
8. Guddi-Hoosaadku wuxuu qiimayn ku sameeyaa arrimaha ay u xilsaaran yihiin wixii ku adkaadana waxay la kaashadaan warbixin joogto ahna ka siiyaan Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda iyo xubnaha intooda kale.

## II. Guddi-Hoosaadka Imtixaanaadka & Shaqoqorista

1. Dejinta iyo qaadista imtixaanaadka lagu qoro shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda iyo kuwa Gobollada & degmooyinka, isagoo awood u leh inuu u yeerto ama kaashado ciddii hadba nooca imtixaanka la qaadaayo aqoon iyo khibrad u leh.

2. Hubinta saxnimada dokumentiga Guddi-Hoosaadka loogu soo gudbiyo shaqoqorista awgeed, isagoo la kaashanaaya Guddiga Qaranka ee Hubinta iyo Qiimaynta Dokumentiyada ee hoos yimaada Wasaaradda Hiddaha & Tacliinta Sare iyo hay'adaha kale ee Dawladda.
3. Natiijooyinka imtixaanaadka & shaqoqorista waxay u soo gudbinayaan Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda si uu u Meelmariyo, isagoo la tashanaya Xubnaha kale ee Guddiga Fulinta.

## III. Guddi-Hoosaadka Diiwaangelinta & Tababarrada

1. Diiwaangelinta Shaqaalaha cusub ee shaqada Dawladda loo qoro, iyadoo uu mid kasta siinaayo lambar u gaar ah.
2. Kaydinta dokumentiga shaqaalaha iyo galalkooda (mid walba gal u gaar ah).
3. Jaangoynta iyo dejinta tababarrada kala duwan ee la siinaayo shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda isagoo iskaashi kala yeelanaya Wasaaradda Shaqada & Horumarinta Shaqaalaha iyo Hay'adaha kale ee ku shuqul yeelan kara..
4. Hoggaaminta casharbixinta tababarrada loo furo shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda isagoo iskaashi kala yeelanaya Wasaaradda Shaqada & Horumarinta Shaqaalaha iyo Hay'adaha kale ee ku shuqul yeelan kara.

5. Guddi-Hoosaadkani wuxuu fulinta hawlihiisa la kaashan karayaa cid kasta oo aqoon iyo waayo-aragnimo ay bidaan.
6. Waxay warbixin joogto ah hawlahooda ka siinayaan Guddoomiyaha Guddiga si uu isaguna markiisa u hor dhigo fadhiyada Guddiga ama Hay'adaha kale ee ku shaqada leh.

## Qodobka 24-aad
## Maamulka Miisaaniyadda Guddiga

Maamulka Miisaaniyadda Guddiga waxaa loo dejin doonaa habraac nidaamsan oo u gaar ah iyadoo lala kaashanaayo Xisaabiyaha Guud ee Dawladda iyo Wasaaradda Maaliyadda.

## Qodobka 25-aad

## Xafiisyada Guddiga

Haddii ay awoodda dhaqaale u saamaxdo, Guddigu wuxuu yeelanayaa Xafiisyada soo socda:

1. Xafiis u gaar ah Guddoomiyaha Guddiga
2. Xafiis u gaar ah Guddoomiye-Ku-Xigeenka Guddiga
3. Xafiis u gaar ah Xoghayaha Guddiga
4. Xafiis u gaar ah Maamulka Xisaabaadka Guddiga
5. Xafiiska u gaar ah Guddi-Hoosaadka Kormeerka, Anshaxa & Abaalmarinta.
6. Xafiis u gaar ah Guddi-Hoosaadka Imtixaannada & Shaqoqorista
7. Xafiis u gaar ah Guddi-Hoosaadka Diiwaangelinta & Tababarrada

## Qodobka 26-aad
## Nabadgelyada Goobta Shaqada Guddiga

1. Xafiisyada Guddiga waxaa ka reebban in hub lala soo galo, nooc kasta ha ahaadee (toorreyda, mindiyaha iyo uluhuba hubka ayay ku tirsan yihiin –"Arma Bianca").
2. Sugidda Nabadgelyada goobta shaqada ee Guddiga waxaa u xilsaaran Guddiga Fulinta iyo dhammaan xubnaha Guddiga waxayna la kaashan karaan Hay'adaha Nabadgelyada.

## Qodobka 27-aad

## Xiriirka u dhexeeya Guddiga iyo Wasaaradda Shaqada & Horumarinta Shaqaalaha

1. Guddiga iyo Wasaaradda waxaa ka dhexeeya xiriir joogto ah iyo wadashaqayn buuxda.
2. Wasaaradda waxay Guddiga wakiil uga tahay Golaha Xukuumadda.
2. Haddii loo baahdo, Wasiirka Wasaaradda ama Ku-Xigeenkiisu waxay isugu yeeri karaan Guddiga kulammo.

## Qodobka 28-aad

## Dhaqangalka Xeer-Hoosaadka Guddiga

Xeer-Hoosaadkani wuxuu dhaqan gelayaa isla taariikhda ay ansixiyaan xubnaha Guddigu.

**Baydhabo, 13/12/2006**